Xaashida Xaqiiqada: Jimciyadaha Midoobey
**Dabikhida sharciga**

Maalinta 1da Nufeembar 2012, Xeerka 1981 ee Jimciyadaha Midoobay (*Associations Incorporation Act 1981)* waxaa bedeli doona *Associations Incorporation Reform Act 2012*. Xeerka cusub waxaa ku jira 'qaabayn ku meel-gaara' si loo caawimo jimciyadaha inay la qabsadaan qaanuunka cusub. Kuwaasna hoos ayaa lagu muujiyey.

## Xaallada jimciyadaha midoobay

Jimciyada kasta oo la midoowday xeerkii hore waxay noqonaysaa mid la midoowday xeerka cusub. Taariikhda la midoobidu ma saamaynayso shahaadada la midoobiduna ma dhacayso.

## Ujeedooyinka caddaynta

Marka xeerka cusubi bilawdo, ujeedooyinka caddaynta waxaa toos loogu qaadanayaa inuu qayb ka yahay xeerka.

Jimciyada raadinaysa inay la midoowdo markii ugu horreeyey ka dib marka xeerka cusubi bilawdo maaha inuu buuxiyo foomka 'Caddaynta ujeedada', laakiin waa inay ku muujisaa hadafka xeerarkeeda la soo jeediyey.

Haddii jimciyadu dalbato inay bedesho xukunkeeda ka dib marka sharciga cusubi bilawdo, hadafkeeda waa in lagu daraa xukunkeeda cusub.

## Xukumada

Jadwalka 1aad ee Xeerka cusub wuxuu ka kooban yahay qaybo cusub kaas oo xukunka jimciyadu raacayo. Kuwaan waxaa ku jira:

- Magaca jimciyada iyo ujeedadeeda
- Xuquuqda xubnaha iyo waajibaadka
- Hababka casilaada iyo joojinta xubinimada
- Habka magacaabida iyo shaqa ka saarida xoghayaha
- Diyaarinta iyo xafidida wixii laga wada hadlay ee fadhiyada guud iyo kulamada fadhiyada
- U ogolaanshaha xubnaha inay hellaan wixii lagaga wada hadlay fadhiyada guud, kuwaas oo ay ku jiraan cadaymaha dhaqaalaha loo soo gudbiyey fadhiyada guud
- Xaqa helida (haddii lagu sheegay xukunka) xubnaha wixii lagaga wada hadlay fdhiyada guud.

Hadday isticmaalayso jimciyadi keeda ama midka xukunka guud, uma baahna inay ku degdegto inay ku bedesho sharciga cusub.

**Jimciyadaha isticmaalayada xukunkooda**

Haddii jimciyada isticmaalaan xukunkooda (kaas oo aan ahayn xukunka guud), xukumada jiraa way jiraan ilaa la bedelo. Marka xubnuhu go'aansadaan inay wax isbedel ah sameeyaan xukumada cusubi waa inay iyaguna wax ka qabtaan qodob kasta oo looga baahan yahay jadwalka cusub. Isla markaas haddii ay jiraan waxaan la jaanqaadayn, xukumada jimciyadaha iyo Xeerka cusub, shuruudaha Xeerka ayaa shaqaynaya.

**Jimciyadaha isticmaalaya xukunkamada guud**

Jimciyadahaani waa inay dib u eegaan xukumada guud si ay go'aan uga gaaraan haddii ay ku haboon yihiin hadafkooda. Haddii jimciyadahaani aanay la socodsiin Consumer Affairs Victoria wixii ku saabsan xukumada 12 bilood gudahood marka qaanuunka cusubi bilawdo, xukumadooda hadda ah ayaa toos u bedelaya xukumada guud ee cusub.

Haddi aan jimciyadi u sheegin Consumer Affairs Victoria, inay awoodo:

- Inay u guurto xukumada guud oo cusub
- Inay abuuratu xukumadeeda.

Laga bilaabo 1da Nufeembar 2012, ka raadi xukumada guud oo cusub www.consumer.vic.gov.au/forms.

| |
|---|
| Xukumada jimciyadu (ama kuwa gaara ha ahaadeena ama kuwa guude) waa inuu wax ka qabtaa dhamaan qodobada ku qoran jadwalka 1aad. Haddii aanay ahayn, bixinta xukunka khuseeya oo guud ee cusub oo wax ka qabanaya qodobka loo arko in lagu daro xukumada. |

| |
|---|
| Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan sida loo bedelayo xukunka, arag xaashida xaqiiqada ee (**Xukumada Jimciyada**) **Association rules**. |

## Sarkaalka Dadweynaha oo lagu bedelay Xoghayaha

Sida waafaqsan Xeerka cusub, erayga 'Sarkaalka dadweynaha waxaa bedelay erayga 'xoghaye'.

Dukuminti kasta oo uu ansixiyey sarkaal sida waafaqsan Xeerkii hore ma saamaynayso.

Marka Qaanuunka cusubi bilawdo, xoghayuhu waxaa laga yaabaa inuu sii wado ama dhamaystiro hawl walba oo uu bilaabay sarkaalka dadweynuhu. Consumer Affairs Victoria wuxuu u qaadanayaa in kani yahay isla qofkii haddii aan si  kale loo sheegin.

## Caddaynta dhaqaalaha

Xeerka cusub ayaa kuu sheegi doona qaabka warbixinta oo saddex nooc ah. Jimciyaduhu waxay noqonayaan qaybta 1aad, Qaybta 2aad ama Qaybta 3aad, waxay ku xiran tahay waxay soo saaraan. Tusaale ahaan:

- Qaybta 1aad: $0 - $250,000
- Qaybta 2aad: $250,000 - $1,000,000
- Qaybta 3aad: ka badan $1,000,000.

Qaabkaan cusub wuxuu bedelayaa qaabkii hore ee 'la xusay' iyo kaan la xusin.

Jimciyadaha midoobay waa inay fahmaan qaabka cusub ayna ogaadaan midka hoos yimadaan, maadaama kaasi saamaynayo waajibaadkooda warbixineed. Booqo websaytka consumer.vic.gov.au/associations wixii faahfaahin ah.

### Qaab cusub oo lagu soo gudbinayo qoraallada dhaqaale

Consumer Affairs Victoria wuxuu kuu soo diri doona qoraal sanadeedka cusub iyada oo ku qoran foom cusub oo jimciyadaha dhamaadka sanad dhaqaalaadka ama wixii ka dambeeya 1da Nufeembar 2012.

Jimciyadaha sanad dhaqaalaadka dhamaanayo 30ka Juun ka hor 2013 waxay kala dooran karaan inay gudbiyaan caddayn sanadeedka foomkaan ku qoran foomkii hore ee la xusay/aan la xusin. Arag faahfaahinta qaybta hore.

Xoghayaha (Sarkaalkii dadweynaha ee hore) ayaa masuul ku xeraynta caddayn sanadeedka Consumer Affairs Victoria.

Intii la diri lahaa foomka caddayn sanadeedka bil ka hor caddayn dhaqaaleedka jimciyada dhamaadka taariikhda, Consumer Affairs Victoria ayaa soo diri doonta **hal bir ka hor**. Jimciyadu waxay haysataa **shan bilood** laga bilaabo taariikhda ay dhamaanayso sanad dhaqaaleedku si loo qabto fadhiga guud ee sanadeedka lana qadimo caddayn sanadeedka.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan sida loo diyaariyo loona soo gudbiyo caddayn sanadeedka, arag Factsheet: **Annual cycle and financial reporting**.

### Hababka lagu soo gudbinayo caddaymaha

Jimciyad kasta oo ku midowday sida waafaqsan Xeerkii hore waxay dooran kartaa inay diyaariso soona gudbiso caddaymaha dhaqaalaha sida waafaqsan xeerkii hore, laakiin keliya sanad dhaqaalaadka dhamaanaya ka hor 30ka Juun 2013.

Tusaale ahaan, Jimciyada sanad dhaqaaleedkeedu yahay 1da Janaayo 2012 ilaa 31ka Diseembar 2012 waxay dooran kartaa inay soo gudbiso caddaymaha dhaqaalaha iyada oo waafaqsan nadaamka qaybta 1aad ee 'la xusay/aan-la-xusin.

Jimciyada sanad dhaqaaleedkeedu dhamaanayo 30ka Juun 2013 waxaa waajiba inay u soo gudbiyaan caddaymaheeda sida waafaqsan nadaamka cusub.

Haddii jimciyadu soo gubiso caddaymaha dhaqaalaha iyada oo la isticmaalayo nadaamka 'la xusay/aan la xusin, xoghayuhu waa in uu kala xiriiraa Consumer Affairs Victoria ama xeraynta foomka, isaga oo muujinaya haddii jimciyadu ay warbixinayso sida lagu xusay ama aan-lagu xusin sanad-warbixneedka 2012-2013.

## Habka joogta ah

Haddii jimciyadu ay samaysay dalab sida waafaqsan Xeerkii hore oo aan la dhamaystirin ka hor intaan Xeerka cusubi bilaaban, waxaa la malaynayaa in loo sameeyey sida waafaqsan helida qoraallada ee Xeerka cusub.

Consumer Affairs Victoria wuxuu awoodi doonaa inuu socodsiiyo dalabyada badankood lagu xereeyey sida waafaqsan Xeerkii hore iyada oo aan loo baahan macluumaad intaas ka badan. Si kasta ha ahaatee, waan wargelinaynaa jimciyada haddii aan u baahanahay faahfaahin intaas ka badan.

Xal kasta, ballan ama ogeysiin lagu soo diray sid awaafaqsan Xeerkii cusbaa waa jiri doona sida waafaqsan Xeerka cusub.

Fal kasta oo ay qaado Consumer Affairs Victoria sida waafaqsan Xeerkii hore waxaa loo qaaday si waafaqsan Xeerka cusub.

## Ma rabtaa macluumaad intaas ka badan?

### Consumer Affairs Victoria

Consumer Affairs Victoria wuxuu diiwaangeliyaa oo xeeriyaa jimciyadaha midoobay ee Fiktooriya, wuxuuna wax ku maamulaa sharciga jimciyadaha midoobay.

W: consumer.vic.gov.au/associations

T: 1300 55 81 81

### PilchConnect

PilchConnect waa ururu faaiido ma doonta ah oo madax banaan kaas oo siiya adeegyo sharciyeed iyo talo kooxaha bulshada.

W: pilchconnect.org.au

T: 03 8636 4400